

SUPERINTENDENT SEARCH



Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxay raadinayaan kormeere/hoggaamiye cusub waxaana u baahannahay taladiina.

Guddoonka Waxbarashadu wuxuu matalaa danaha dadweynaha iyo go'aanmada degmada wuxuuna masuul ka yahay shaqaalaynta kormeere cusub. Ra'yigiinu waa muhiim wuxuuna naga caawiyaa inaan ogaanno tayada aad rabtaan inuu yeesho kormeeraha cusub, sidoo kale wuxuu ra'yigiinu ka caawinayaa Guddoonka Waxbarashada inay shaqaaleeyaan kormeere ku habboon Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS).

Waxaa la'idinku Martiqaadayaa inaad ka soo Qeyb-gashaan Kulanka Bulshada

Mid ka mid ah qaababka uu Guddoonka Waxbarashadu u uruurinayo talooyinka bulshada waa kulamo afar ah oo bulshada loo qaban doono. Kulan kasta wuxuu ka koobnaan doonaa warbixin iyo wada-hadal si koox koox ah 10-12 qof u dhici doona. Wada-hadallada waxaa hagi doona xiriiriye oo su'aalana weydiin doona kooxaha iyadoo islamarkaana la uruurin doono fikradaha iyo talooyinka kooxaha oo dhan. Barnaamijku wuxuu ku bixi doonaa luuqadaha kala ah English, Hmong, Somali, Karen iyo Spanish. Waxaa jiri doona cabitaan fudud sidoo kalena adeegyada daryeelka carruurta/haynta ilmaha.

Fadlan Ka soo Qeyb-gal:

Khamiis, Diseembar. 15, 2016

Goobta: Washington Technology | 1495 Rice St.

Wakhtiga Imaanshaha 5:30 p.m.

Wakhtiga Kulanka 6-8 p.m.

Arboco, Janaayo. 11, 2017

Goobta: Central Senior High | 275 Lexington Pkwy N.

Wakhtiga Imaanshaha 5:30 p.m.

Wakhtiga Kulanka 6-8 p.m.

Talaado, Jan. 17, 2017

Goobta: Harding Senior High | 1540 6th St. E.

Wakhtiga Imaanshaha 5:30 p.m.

Wakhtiga Kulanka 6-8 p.m.

Sabti, Janaayo. 21, 2017

Goobta: Humboldt High School | 30 East Baker St.

Wakhtiga Imaanshaha 9:30 a.m.

Wakhtiga Kulanka 10 a.m. - 12 p.m.

Fursadaha kale ee aad ku soo gudbin karto talo-bixintaada

- Ma imaan kartid miyaa shirka bulshada? Waxaad codsan kartaa inaad hesho xiriiriye kuu sharaxa wadahadalka adoo booqanaya spps.org/superintendentsearch.
- Ka qeyb-qaado ra'yi uruurinta ku saabsan tayada la doonayo in uu yeesho kormeeraha cusub; oo diyaar noqon doona Diseembar 15.
- Ka soo qeyb-gal kulanka bulshada ee lagula kulmayo dhowrka qofka ee ku soo baxda is-reereebka ugu dambeeya; oo si ku meel gaar ah loo qoondeeyay inuu dhoco bisha Abriil.